WARGELIN KU SAABSAN DOORASHADA GOLAYAASHA DEEGAANKA EE 2021

Wadanka Finland wuxuu u qaybsamaa degmooyin, kuwaas oo sida dastuurku uu qabo leh is maamulo. Degmooyinku waxay go'aan ka gaaraan waxyaabo badan oo khuseeya shacabka degmadaas.

Golaha deegaanka ee ugu sareeya oo go'aan gaari karaa waa golaha shacabku soo doorto ee ay soo xushaan. Xubnaha golaha degmada oo ah wakiilada la soo doortay afartii sannadoodba mar baa la soo doortaa. Doorashada golaha deegaanka ee soo socotaa waa **Axadda 13.6.2021.**

Doorashada golaha deegaanka waxaa codayn kara isna soo sharaxi kara qof walba oo Finland deggan oo jinsiyad Finland ah haysta iyo sidoo kale musharaxiinta qaarkood deggan dalka Finland oo haysta jinsiyad dalal kale kuwaas oo buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay.

Codayntu Finland cid walba wey u madax banaan tahay codkooda.

Gobalka Ahvenanmaa deegaankiisa doorasho degmo lagama howlgelinayo sannadka 2021.

Xuquuqda codaynta – yaa codayn kara

Doorashada golaha degmooyinka waxaad codayn kartaa, haddii aad ledahay dhalashada Finland ama dhalashada wadan kale oo ka mid ah wadamada Midowga Yurub, Aysland ama Norwey, isla markaasna aad buuxinayso shuruudahan soo socda:

- 18 sano ayaa kuu buuxsamaysa ugu dambayn maalinta doorashadu dhacayso (13.6.2021)
- ugu dambayn 23.4.2021 waxaad Finland ku leedahay degmo aad ka tirsan tahay

Haddii aad tahay qof wadan kale dhalashadiisa haysta, doorashada golaha deegaanka waxaad codayn kartaa, haddii

- 18 sano kuu buuxsamayso ugu dambayn maalinta doorashadu dhacayso (13.6.2021)
- inta ka horaysa 23.4.2021 aad ugu yaraan labo sano oo xiriir ah Finland ku lahayd degmo aad ka tirsan tahay oo daganayd

Degmo ka tirsanaantu waxay waafaqsan tahay sida uu dhigayo sharciga degmo ka tirsanaantu. Sida caadiga ah degmada aad ka tirsan tahay waa tan aad deggan tahay.

Doorashada golaha deegaanka ee sannadka 2021 qofku degmada uu ka tirsan yahay waa midda nidaamka diwaanka dadweynaha kuugu qoran maalinta ay taariikhdu tahay 23.4.2021 saacaddu markay tahay 24 ama 12 saqda dhexe.

Haddii loo baahdo waxaad ka hubin kartaa xafiiska diwaangelinta bulshada (Digi- ja väestötietovirasto) warbixinta degmada aad ka tirsan tahay.

Doorashada golaha deegaanka waxaad u codayn kartaa oo keliya musharax degmadaada iska soo sharaxay.

Wargelinta xuquuqda codeynta waxaa loo diraa dhammaan dadka xaqa u leh in ay codeeyaan

Wakaaladda diiwaan-gelinta dadweynaha (Digi- ja väestötietovirasto) ayaa haya diwaanka xuquuqda cod-bixinta. Looma baahna inaad si gaar ah isaga soo diwaangeliso diwaanka xuquuqda codayta.

Xafiiska diwaan-gelinta shacabka (maistraatti) ayaa qof walba oo xuquuqda codaynta leh oo cinwaankiisa la hayo u soo dira ogeysiin ku saabsan xuquuqda codaynta ugu dambayn **20.5.2021** haddii ciwaanka laguugu soo dirayo la hayo. Kaarka ogaysiinta cod-bixinta waxaad ku heli kartaa qaab elektroonig ah kaliya haddii aad isticmaasho nidaamka elektrooniga ah ee xafiiska diwaanku (Digi- ja väestötietovirasto) ay bixiyaan aad haysato, kaas oo ah fariimaha Suomi.fi (macluumaad dheeri ah waxaad ka heli kartaa www.suomi.fi/viestit). Kaarka ogeysiinta cod-bixinta waxaa ku qoran tilmaamo iyo warbixino ku saabsan codaynta, liiska goobaha lagu codayn karo ee adiga kuu dhow iyo macluumaad ku saabsan xuquuqdaada codaynta. Ogaysiiska xuquuqda cod-bixinta uma baahnid in aad u soo qaadato goobta aad ku codaynayso, waxaa kugu filan aqoonsigaaga.

U qalmidda doorashada – Yaa musharax noqon kara

Doorashada waad ka qaybgeli kartaa oo waad u qalantaa inaad isu soo sharaxdo degmadaada, haddii aad buuxisid shuruudahan soo socda:

- degmada aad rabto inaad isu soo sharaxdo waa inay tahay degmada aad ka tirsan tahay ee aad dagan tahay
- degmooyinka qaarkood ayaad ku leedahay xuquuqda codaynta
- laguguma cadeynin in aad tahay qof awoodiisu masuuliaydeed dhantaallan tahay oo u haysta go’aan maxkamadeed.

Qaar ka mid ah shaqaalaha dowladda iyo shaqaalaha maamulka degmooyinka ee jagooyinka sare haya iyo kuwo ka mid ah shaqaalaha degmadu, doorashada ma geli karaan oo isma soo sharaxi karaan oo uma qalmaan.

Soo sharaxidda musharaxiinta doorashada golaha degmooyinka

Doorashada golaha degmooyinka waxaa musharaxyada soo sharaxi kara

- xisbiyada la diwaan-geliyey
- dadka codaynta xuquuqda u leh ee samaystay urur doorasho.

Xisbiyadu iyaga ayaa go'aan uga gaadhaya musharaxiintooda sida aay sharciyadoodu waafaqsanyihiin. Haddii aad rabto in aad xisbi iska soo sharraxdo, waa in aad xisbigaas kala heshiisaa.

Si loo samaysto urur doorashada ka qayb gala, waxaa loo baahan yahay ugu yaraan toban qof oo degmada degan oo xaq u leh inay codeeyaan, degmooyinka aadka u yaryarse waxaa looga baahan yahay saddex ama shan qof kaliya.

Laba xisbi ama in ka badani waxay xaq u lee yihiin inay samaystaan bah-wadaag doorashada isla gasha. Laba urur doorasho iyo wixii ka badan waxay xaq u leeyihiin inay samaystaan hal liis oo musharixiin ah oo doorashada uga qayb qaata.

Xisbiyada, ururada dooradshada bah-wadaagta ku noqda ama ururo hal liis wada samaystay waxay degmada ku yeelan karaan ugu badnaan tiro u dhiganta hal iyo bar cadada wakiiladda la soo dooranayo ah. Wakiiladda la doorto ee la soo xushaa waxay noqon karaan iyada oo tirada dadka ee markaas degmada ku nool ku xiran ugu yaraan 13 ilaa iyo 79 wakiil, laakiin degmada ayaa go'aan ku gaadhi karta in intaas ka badan haddii ay rabto.

Mid kasta oo musharax ahi wuxuu lee yahay lambar u gaar ah Musharaxyada waxaa lagu soo dhajiyaa waraaqo la soo daabacay oo ay ku wada taxan yihiin liiska musharixiintu, liiskaas oo musharaxiinta loo sameeyo lambaro nidaamsan oo isku xig-xiga kana bilaabma lambar 2. Musharixiintu waxay liiskaas taxanaha ah ugu qoran yihiin xisbi-xisbi iyo liisaskooda bah-wadaagta ah. Qof kasta oo musharax ah waxaa liiska taxanaha ah ugu qoran warbixintan soo socota sida: magaciisa, lambarkiisa musharaxnimo iyo shaqadiisa. Waxaa intaasi dheer oo oo liiska taxanaha ah ku qoran

- xisbiyada wada samaystay bah-wadaag ah inay doorashada isla midoobaan
- kuwa ururada doorashada bah-wadaagta ku noqday oo liis wada jir ah samaystay
- kuwee ayaan xisbiyada ku jirin bah-wadaagta xisbiyada doorashada kuwada midoobay
- kuwa musharaxiinta iyagu banaanka ka ah ee iyagu liiska wada samaystay oo bahoobay.

Xidhiidhinta liiska musharaxiinta waxaa la soo dhajinayaa 14.5.2021. Taxanaha degmadaada u gaarka ah waxaad ka heli kartaa tusaale ahaan qolalka codaynta iyo

bogga doorasha ee wasaaradda cadaaladda (www.vaalit.fi). Haddii aad wakhti hore aad ka codayneyso meel aan ahayn degmadaada, waxaad ka codsan kartaa masuuliyiinta xilka codeynta ku shaqo lihi inay ku siiyaan taxanaha liisaska musharaxiinta ee degmadaada.

Wakhtiyada cod-bixinta

Waxaad codayn kartaa maalinta doorashada oo ah Axadda 13.6.2021 ama maalinta doorashada ka hor inta lagu jiro wakhtiga horay u sii codaynta. Waxaa la codeyn karaa hal mar oo kaliaya. In labo mar la codeeyo waa dembi ciqaabtiisu ku qoran tahay sharciga dembiyada.

Horay u sii codayn:

Horay u sii codayntu waxay Finland ka bilaamaysaa **Arbacada 26.5.2021** waxayna dhammaaneysaa **talaadada 8.6.2021**

Horay u sii codayntu waxay wadanka dibaddiisa ku eg tahay **arbacada 2.6.2021,** waxayna dhammaaneysaa **sabtida 5.6.2021**.

Horay waad uga sii codeyn kartaa meel kasta oo ka mid ah meelaha cod-bixinta hordhaca looga samayn karo ee dalka gudihiisa ama dibaddiisa ku yaal. Goobaha cod-bixinta sida hordhaca ah looga codeyn karaa waxay yihiin

- kuwo dalka gudihiisa ku yaal oo ah goobo ay cayimeen degmooyinku oo cod-bixintu oo si hordhaca ah looga codeyn karo, sida qaalibka ahna waa xafiisyada degmooyinka
- kuwa dibadduna badanaa waxay ku yaaliin safaaradaha Finland dhexdooda,
- xarumaha, sida cisbitaalada, waaxyaha daryeelada arrimaha bulshadu ka howlgalaan iyo xarumaha ciqaabta oo kale.
  Xarumaha kuwa ku yaal waxaa kaliya oo ka cod-bixn kara dadka markaas meeshaas lagu hayo ama shaqsiyaadka loo qaatey oo kaliya.
- Maraakiibta Finland ee dibadda ku maqan wakhtiga cod-bixinta hordhaca ah ahi ay dhacayso. Maraakiibta dhexdooda waxaa ka cod-bixin kara dadka shaqaalaha ka ah kaliya, dadka rakaabka ahi kama cod-bixin karaan markabka dhexdiisa.

Codeynta maalinta cod-bixinta

Maalinta cod-bixntu waa **Axadda 13.6.2021 saacaddaha u dhaxeeya 9–20.**

Waxaad ka cod-bixin kartaa maalinta doorashadu dhacayso kaliya degmada aad dagan tahay iyo goobta cod-bixinta ee laguugu soo qoray kaarka ee laguu soo diray. xuquuqdaada codbixinta

Gurigaaga dhexdiisa oo aad ku cod-bixiso:

Haddii awoodaada socod ama hawl qabashadaadu ay tahay mid xadidan oo aadan gaari karin goobaha cod-bixinta si dhib la'aan ah, waxaad codkaaga ku dhiiban kartaa guriga mudada lagu jiro cod-bixinta hordhaca ah wakhtigeeda.

Guriga ama meesha aad dagan tahay inaad ku cod-bixiso diiwaan gelinteeda maalinta ugu dambaysa ee la is diiwaangelin karaa waa **Talaadada 1.6.2021** ka hor saacaddu markay tahay 16. Diiwaan gelinta waxaa laga sameyn karaa degmada aad dagan tahay gudigeeda dhexe ee doorashada, kuwaas oo warbixintooda aad ka heleysid wargelinta xuquuqda codeyntaada. Qofka guriga kula dagan oo ah qof ehel ah oo ku haya isagana shuruudaha qaarkood marka loo eego isla markaas ayuu kula codeyn karaa.

Waraaq ahaan ku codeynta:

Haddii aad wakhtiga hordhaca codaynta lagu jiro iyo maalinta doorashadaba aad dibadda joogto, dalka dibadiisa waxaad kaga soo codeyn kartaa warqad ahaan.

Si aad waraaq ahaan ugu soo codayso waa in aad ka dalbataa macluumaadka waraaqaha aad ku codaynayso wasaaradda cadaaladda adeegga dalabkoodaa aanad ku dalbataa ciwaanka dibadda ah. Dalabka waxaa la samayn karaa ugu horrayn saddex bilood kahor maalinta codaynta. Maadaama aad adigu leedahay xuquuqda codaynta adiga ayaa ka mas'uul ah in aad wakhti hore dalbato waraaqaha aad ku codayn karto, iyo in aad dib ugu soo dirtid guddiga doorashada ee degmadaada waraaqdaada codaynta mudadaa sharciga codeynta lagu cayimey gudaheeda.

Sidaan baad u cod-bixin kartaa

Cod-bixintu waxay ka dhacaysaa goobaha cod-bixinta. Waxaad kaliya oo u codayn kartaa hal qof, qofkaas oo musharax ka ah degmadaada kuna jira calaamadeysan liiska musharaxiinta.

1) Waa in aad u caddayso shakhsiyadaada hawl-wadeenada dawladda macnaha waa inaad tusto baasaboor, kaar teesara ah, laysan baabuur ama wuxuun u dhigmi kara oo macluumaad aqoonsi ah. Ka dib hawl-wadeenada doorashada ayaa waxay ku siinayaan tikidka cod-bixnta.

2) Gal qolka yar ee cod-bixnta. Qolka yar ee cod-bixinta halkii mar hal qof oo kaliya ayaa geli kara.

3) Ku calaamadi tikidka cod-bixnta qofka aad codkaaga siinayso lambarkiisa. Hal qof oo keliya ayaadna u codayn kartaa. Ku qor lambarka musharaxa aad u codaynayso tikidka cod-bixinta gudihiisa goobada ku taala. Wax kale ha ku qorin oo ha ku calaamadin tikidka

cod-bixinta. Isku laab tikidka cod-bixinta si markaas lamabrkii aad ku qortay uu gudaha u galo oo aan cidna u arag banaankana uga muuqan.

4) Tikidka oo isku laaban u geey hawl-wadeenada doorasha. Hawl-wadeenka doorashada ayaa tikidka shaabadaynaya.

5a) Haddii aad maalinta doorashada codaynayso, **tigidhka oo shaabbadaysan ku rid sanduuqa codaynta.**

5b) Haddii aad maalinta doorashada ka hor hor cod-bixinayso**, shaqaalaha doorashada ayaa ku siinaya baqshadda doorashada, taas oo aad tikidkaagi oo shaabadaysan ku xirayso.**

Haddii aadan awoodin inaad musharaxa aad dooranayso lambarkiisa ku qorto tikidka cod-bixinta oo aad si cad u tabar daran tahay, waxaad isticmaali kartaa oo cod-bixinta kaa caawin kara qofkii aad doorato inuu ku caawiyo ama qof xafiiska cod-bixinta ka shaqeeya. Qofka ku caawimayaa ma noqon karo qof ka mid ah musharaxiinta. Caawiyaha waxaa waajib ku ah inuu xogtaada sirta kuu ah qariyo , macnaha waa in uu sir ahaan u xafido wixii xog ah ee uu codka aa bixisay ka ogaaday.

Faah-faahin dheeraad ah

- Wixii faah-faahin dheeraad ah ee doorashada ku saabsan waxaa bixiya oo aad ka helaysaa guddiga dhexe ee doorashada degmada aad ku nooshahay.
  Su'aalaha shakhsi ahaaneed ee ku saabsan xuquuqda codaynta waxaa kaaga jawaabaya xafiiska diiwaangelinta bulshad (Digi- ja väestövirasto).
  Labadaba macnaha gudiga dhexe ee doorashada iyo xafiiska diiwaangelintaba warbixinahoodu waxay ku qoran yihiin kaarka ogeysiinta cod-bixnta ee laguu soo diro.

- Goobaha hordhaca looga sii codeeyo cinwaannadooda iyo wakhtiyada ay furan yihiin iyo diwaanka musharaxiinta iyo wixii kale ee warbixin ah ee doorashada ku saabsan waxay ku qoran yihiin Wasaaradda cadaaladda bogeeda doorashada oo cinwaankiisu yahay **www.vaalit.fi**

- Wararka ku saabsan musharaxiinta doorashada golaha degmooyinka waxaad ka heleysaa bogga doorashada ee wasaaradda cadaaladda 14.5.2021 wixii ka dambeeya warbixinaha ku saabsan goobaha hordhac ahaanta looga codayn karana waxaad ka heli kartaa isla boggaas 12.4.2021 wixii ka dambeeya.

- Sanadkan dib u dhigista doorashada golaha deegaanka xeerka sharciga ee la siiyey (256/2021) sida uu dhigayo nooca ku taariikhaysan waa bishii diisember warbixintii la soo shaaciyey.

Wakaaladda diiwaan-gelinta dadweynaha (Digi- ja väestötietovirasto) 29.3.2020